Ogeysiiska DSHS ee Habdhaqanada Asturnaanta loogu talogalay Macluumaadka Caafimaadka Macmiilka

DSHS Notice of Privacy Practices for Client Medical Information

Dhaqan galeya 23 Sibteembar, 2013

DSHS waa in ay kugu soo wargeliso xuquuqahaaga asturnaanta Xeerka La-xisaabtanka iyo Macluumaadka Caafimaad ee La Wareejin Karo (HIPAA). (45 CFR 164.520). DSHS waa "jiritaan isku jir ah." Ma aha in dhammaan DSHS uu cayminayo HIPAA, kaliya barnaamijyada loogu qoray sida Waxyaabaha uu Ka Koobmo Daryeelka Caafimaad mareegtada DSHS ayuu caymiyaa HIPAA. Ogeysiiska waxaa kaliya loo adeegsan karaa macaamiisha ay u adeegaan barnaamijyada la caymiyay. Ogeysiiskan ma saameynayo u-qalmitaankaaga adeegyada DSHS.

Ogeysiiskan wuxuu qeexayaa sida macluumaadka caafimaad ee adiga kugu saabsan loo adeegsan karo loona sheegi karo iyo sida aad ku heli kartid macluumaadkan. Fadlan si taxadir leh dib-u hubin ugu samee.

Waa maxay PHI?

Macluumaadka Caafimaad ee Dhawrsan (PHI) waa macluumaadka caafimaad ee macmiilka ee ay hayso qaybo ka mid ah DSHS uuna caymiyay xeerka HIPAA. PHI waa macluumaad caafimaad oo lala xiriirimayo adiga kuna saabnsa xaalkaaga ama xaaladaada caafimaad, daryeelka caafimaad ee aad heshid, ama lacag-bixinta loogu talogalay daryeelkaaga caafimaad. DSHS waa in ay dhawrto PHI-kaaga sharci ahaan.

Waa maxay PHI-da ay DSHS aniga iga hayso?

Si aad noogu caawisid in aan kuu adeegno, waxaad u baahan kartaa inaad na siiso macluumaad caafimaad oo ay ka mid yihiin goobta, macluumaadka maaliyadeed ama diiwaanada caafimaad. Waxaan sidoo kale ka heli karnaa PHI-da adiga kugu saabsan ilaha kale ee loo baahan yahay in ay kuu adeegaan ama ay bixiyaan lacagta daryeelkaaga.

Kumaa arka PHI-deyda?

Waxaan kaliya aragnaa inta ugu yar ee macluumaadka PHI ee aan u baahanahay si aan u qabsano shaqooyinkeenna. Waxaa laga yaabaa in aan la wadaagno PHI barnaamijyada kale ama shakhsiyaadka kale haddii uu sharciga oggolaado ama aad adiga oggolaatid. Tusaale ahaan, PHI-daada waxaa la siin karaa oo ayna adeegsan karaan Maamulka Daryeelka Caafimaad yo bixiyeyaasha kale ee daryeelka caafimaad si ay isugu duwaan ayna u bixiyaan lacagta daryeelkaaga caafimaad. Waxaa laga yaabaa in aanu wadaagno PHI-da hore, mid hadda, ama mid mustaqbalka ah.

Waa maxay PHI-da ay DSHS wadaagto?

Waxaan kaliya wadaagnaa PHI-daada ee ay kuwa kale u baahan yihiin si ay u qabtaan shaqadooda iyo sida uu oggol yahay sharciga. Waxaad wayddiisan kartaa liiska qofka arkay PHI-daada ujeeddooyinka qaar.

Goormee ayay DSHS wadaagaysaa PHI-da?

Waxaan u wadaagaynaa PHI-da "si marka loo baahdo ah" si aan isugu duwaridno adeegyada iyo hawlgalada daaweynta, lacag-bixintada, iyo daryeelka caafimaad. Tusaale ahaan, waxaan wadaagi karnaa macluumaad si aan u go'aamino haddii:

- Ay tahay in daaweyn caafimaad la bixiyo.
- Waxaan bixin karnaa lacagta adeegyada bixiyeyaasha daryeelka caafimaad.
- Waxaad u qalmaysaa barnaamijyada DSHS.
- Daryeelka aad ka heshid bixiyeyaasha wuxuu gaarsiisan yahay heerarka sharciga.

Miyaan arki karaa PHI-deyda?

Waxaad arki kartaa PHI-daada. Haddii aad waydiisatid, waxaad helaysaa nuqulka PHI-daada. DSHS waxaa laga yaabaa in ay ujro kaaga qaado nuqulada.

Miyaan bedeli karaa PHI-deyda?

Haddii aad u maleynaysid in PHI-daada ay khaldan tahay, waxaad na wayddiisan kartaa in aan bedelno ama aan ku soo darno PHI cusub. Waxaad sidoo kale waydiisan kartaa in aan u dirno isbedelo kasta kuwa kale ee haysta nuqulada PHI-daada.

Maxaa dhacaya haddii qof kale uu u baahan yahay PHI-deyda?

Waxaa lagu wayddiisan karaa in aad foom saxiixdid si aad noogu oggolaatid inaan wadaagno PHI-daada haddii:

- Aan u baahanahay oggolaanshahaaga si aan u bixino adeegyo ama daryeel;
- Aad naga doonaysid inaan ugu dirno PHI-daada hay'ad ama bixiye kale sababo aan sharciga oggolayn oggolaanshahaaga la'aatii;
- Aad doonaysid in PHI-da loo diro qof kale, sida qareenkaaga, qaraabo ama wakiil kale.

Oggolaanshaaga lagu wadaagayo PHI-daada wuu wanaagsan yahay ilaa laga gaaro dhammaadla taariikhda aad ku qortay foomka oggolaanshaha. Waxaan kaliya wadaagi karnaa PHI-da aad liiska ku qortay. Waxaad baajin kartaa ama bedeli kartaa oggolaanshahan adigoo warqad u soo qoraya DSHS

Ogeysiiska Dhaqamada Asturnaanta DSHS ee loogu talogalay Macluumaadka Caafimaadka ee Macmiilka
Dhaqan galelya 23 Sibteembar, 2013

DSHS miyay wadaagi kartaa PHI-deyda oggolaanshaheyga la'aan?

DSHS waxay wadaagi kartaa PHI oggolaanshahaaga la'aan mararka qaarkood. Sharci ahaan, waxaa lanaga dooni karaa ama la noo oggolaan karaa in aan wadaagno PHI-daada. Tusaalooyinka qaar waxaa ka mid ah baahida loo qabo:

- In loo soo sheego dhacdooyin xadgudub cunug ama qaangaar ama dayacaad Adeegyada Ilaalinta Ilmaha, booliska ama wakaaladaha kale ee ku habboon.
- In la bixiyo diiwaanada hoostagaya amarka maxkamadeed.
- In PHI la siiyo hay'adaha kale ee dib-u eegista ku sameeya hawlgalada DSHS.
- In lala wadaagidda PHI-da wakaaladaha dowladda ee shatiga siisa eena baarta xarumaha caafimaadka, sida guryaha xannaaneynta waayeelada ama isbitaalada;
- In lala wadaago PHI-da bixiyeyaasha adeegga ama hay'adaha kale si ay kuu daryeelaan ama sida loogu baahan yahay si loo go'aamiyo haddii aad u qalantid adeegyo ama dheefo.
- In la siiyo PHI-da mas'uuliyiinta ama waalidiinta carruurta yaryar.
- Si loogu adeegsado PHI-da cilmi-baaris.
- In la adeegsado ama lasheego PHI-da haddii ay dhacdo xaalad degdeg ah ama ujeeddooyin gargaar masiibo.

Xaddad ma u yeeli karaa wadaagidda PHI-deyda iyo sida aan u heli karo?

Waxaad na wayddisan kartaa inaan xaddidno adeegsiga iyo wadaagidda PHI-daada balse khasab ma aha inaan oggolaano. Waxaad sidoo kale na wayddiisan kartaa in aan kuugu soo dirno PHI-daada qaab kala duwan ama goobo kala duwan.

Waa maxay sharci jebinta?

Sharci jebinta waa adeegsiga ama sheegidda PHI-daada ee aan sharci ahaan la oggolayn ayadoo la hoostagayo xeerka HIPAA, marka lagu daro ku waayidda xatooyo, khalad ama u soo dhicidda macluumaadka kumbuyuutarka oggolaansho la'aan. Waxaan kugu soo wargelinaynaa boosto ahaan haddii uu jiro sharci jebinta PHI-taada ee hoos tagaya HIPAA.

Ma haysan karaa nuqul ah ogeysiiskan?

Haa. Ogeysiiskan adiga ayaa haysanaya. Haddii aad ku heshid ogeysiiskan elektarnoonig ahaan, waxaad wayddiisan kartaa nuqul warqad ah anaga mid ayaan ku siinaynaa.

Maxaa dhacaya haddii habdhaqanada asturnaanta PHI ay isbedelaan?

Waxaa lanaga doonayaa in aan u hoggaansano ogeysiiskan. Waxaan xaq u leenahay in aan bedelno ogeysiiskan. Haddii sharciyada ama habdhaqanadeenna asturnaanta ay isbedelaan, waxaan ku soo diraynaa macluumaad ku saabsan ogeysiiska cusub iyo meesha laga helo ama adiga ayaan kuu soo diraynaa.

Kumaan la xiriirayaa haddii aan qabo su'aalo ku saabsan ogeysiiskan ama xuquuqdeyda PHI?

Haddii aad qabtid wax su'aalo ah oo ku saabsan ogeysiiskan, waxaad kala soo xiriiri kartaa Sarkaalka Asturnaanta DSHS DSHSPrivacyOfficer@dshs.wa.gov ama (360) 902-8278.

Sideen uga soo warbixinayaa ku xadgudbidda xuquuqaheyga asturnaanta PHI?

Haddii aad aaminsan tahay in xuquuqahaaga asturnaanta PHI in lagu xadgudbay waxaad ashtako ka soo gudbin kartaa:

DSHS Privacy Officer, Department of Social and Health Services, PO Box 45115, Olympia WA 98504-5115 or by email to DSHSPrivacyOfficer@dshs.wa.gov. Haddii aad soo gudbisid ashtako, DSHS ma badelayso ama ma joojinayso adeegyadaada mana aha in ay kugula kacdo aargoosi.

AMA

Kaga soo gudbi ashtakadaada onlineka: https://ocrportal.hhs.gov/ocr/cp/complaint_frontpage.jsf ama adigoo warqad u soo qoraya: Office for Civil Rights, US Department of Health and Human Services, 200 Independence Avenue, S.W., Room 509F HHH Bldg., Washington, D.C. 20201, phone (800) 368-1019. Wixii ashtako ah ee ku socda DSHS waa in la sameeyo 180 maalmood gudahooda ee sheegashada xadgudubka asturnaanta.